

Ku saabsan warbixintii ugu dambaysay ee Royal Commission

Ku dhowaad kalabar dadka reer Victoria waxay noloshooda la kulmi doonaan cudur maskaxeed. Nidaamka ma gaarsiinaynin kuwa u baahan. Marka, Dowladda Victoria waxay dhistay Gudi Royal ah Nidaamka Caafimaadka Maskaxda ee Victoria.

Guddigu wuxuu ka helay in ka badan 12,500 tabarucad bulshada Victoria.

2019, Guddigu wuxuu soo saaray warbixin ku meel gaar ah oo ay la socdaan talooyin si looga jawaabo baahiyaha degdegga ah. Warbixinta ugu dambaysa waxaa laga heli karaa [websaydka Royal Commission](#). Waxay qeexaysaa isbeddelada nidaamka oo dhan si loo abuuro nidaam caafimaad oo casri ah oo lala qabsan karo iyo caafimaad qabka dhimirka. Nidaam naxariis leh, ka jawaab celinaya isla markaana u fudud qof walba helitaankiisa.

Waxaa jira 65 talo oo na tusaya sida loo abuuro nidaamkan cusub

Talooyinka waxaa kamid ah:

- hubinta in dadka reer Fiktooriya oo dhami ay heli karaan daaweyn, daryeel iyo taageero, iyadoo aan loo eegin asalkooda ama baahidooda.
- ka guurista moodellada dhibaataada horseeday una gudubta qaab ku saleysan bulshada.
- dejinta barnaamijyo taageero qoysaska iyo daryeelayaasha.
- abuurista qaabab cusub oo lagu taageerayo waaritaanka caafimaadka dhimirka iyo ladnaanta.
- dhisida xoog shaqaale oo kaladuwan, balaaran, lehna xirfado iyo khibrad sax ah.
- dejinta qorshayaal ay hogaaminayaan dad khibrad nololeed leh.
- abuurista habab cusub oo loogu talagalay qaybaha sida isboortiga iyo goobaha shaqada si loo taageero caafimaadka dhimirka oo wanaagsan.
- isticmaalista ikniyoolajiyadda, adeegyada casriga ah, cilmi baarista iyo hal abuurnimada si loo abuuro nidaam dabacsan.

Talooyinkaani waxay beddeli doonaan sida aan u siino caafimaadka dhimirka iyo daaweynta ladnaanta, daryeelka iyo taageerada Victoria.

Dowladda Victoria waxay ballan ku qaaday inay fuliso dhammaan talooyinka ay soo jeedisay Guddigu waxayna u heellan tahay inay hadda wax ka qabato.